XEERKA ANSHAXA GANACSIGA

2023

Cidda aanu nahay iyo sida aan
u sameyno shaqadayada

XEERKA ANSHAXA GANACSIGA

HIMILADAYADA

Otter Tail Corporation waxay bixisaa qiimo iyadoo dhisaysa adeega korantada oo xoog leh iyo mashaariicda wax soo saarka.

- Saamileydayada waxaanu u soo saarnaa faa'iido ka sareysa inta caadiga ah iyada oo loo maraayo ganacsi iyo hawlgal aad u fiican iyo kobcinta ganacsigeena.
- Macaamiisheena waxaan ka ballanqaadeynaa tayo iyo qiimo wax walba oo aan sameyno.
- Shaqaalahayaga waxaynu siinaa jawi fursad leh oo ay la socoto la-xisaabtan halkaasoo dhammaan dadka lagu qiimeeyo lagana caawiyo inay qabtaan shaqadooda ugu fiican.

ARAGTIDAYADA

Waxaynu dhisnaa shirkado shaqo oo heer sare ah oo kamid ah urur kala duwanaan leh kaas oo ay asal u tahay adeega korantada.

QIYAMYADAYADA

DAACADNIMO: Waxaynu shaqada u qabanaa si mas'uuliyad iyo si daacadnimo ah.

BADQAB: Waxaan bixinaa goobo shaqo oo ammaan ah waxaanu u baahanahay habdhaqano shaqo oo ammaan ah.

DADKA: Waxaanu dhisnaa xiriiro ixtiraam leh waxaana abuurnaa jawi loo dhan yahay oo ay dhammaan dadku ku hormari karaan.

WAXQABADKA: Waxaynu ku dadaalnaa inaan ugu heer sareyno, raadsano fursada, waxaana fulinaa ballanqaadyada.

BULSHADA: Waxaanu horumarinaa bulshooyinka halka aan ka shaqeyno oo aan ku noolnahay.

OTTER TAIL CORPORATION

KHADKA CAAWINTA EE OTTER TAIL CORPORATION
Telefoonka: (800) 461-9330
FARIIN GAABAN/Qoraal: (218) 394-7272
Bogga Mareegta: coc.ottertail.com
Waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii (adeeg bilaash ah)

KU SOCOTA SHAQAALAHEENNA

CHARLES S. MACFARLANE
MADAXA FULINTA IYO MADAXWEYNAHA

DAACADNIMO AYAA AASAAS U AH GANACSIGEENA.

Ururkeena waxaa lagu dhisay sharaf iyo daacadnimo. Waxaynu ballanqaadnay dhaqan anshaxnimo leh waxaanan kaa filaynaa adiga—agaasimayaasheena, saraakiisheena iyo shaqaalaheena—inaad muujisaan ballanqaadkaas maalin kasta. Waxaan si la mid ah ka rajeyneynaa alaab-qaybiyeyaashayada, iibiyeyaasha, iyo qandaraaslayaasha. Waxaanu kasbannay sumcad iyo waxqabad heer sare ah, waana ku faraxsanahay inaan si kalsooni leh ballanqaadkayaga u siino macaamiisheenna iyo bulshadeena.

Magaca "Xeerka Anshaxa Ganacsiga (Code of Business Ethics)" wuxuu qeexayaa ujeeddada iyo natiijada aan raadineyno inaan ku gaarno u-hoggaansanaanta qodobbada xeerka. Xeerkayaga Anshaxa Gancasiga ayaa sharaxaya mabaadi'da guud ee hagaya cidda aanu nahay iyo sida aan u sameyno ganacsigeena. **Mid kasta oo naga mid ah waxa uu door muhiim ah ku leeyahay oo mas'uuliyadna ka saaran tahay joogtaynta sumcadda uu ururkayaga kasbaday iyada oo loo maraayo go'aamada aan gaarno iyo tallaabooyinka aan qaadayno.** Ahmiyada aan siino dadka, badqabka, iyo daacadnimada ayaa tiirar muhiim ah u ah dadka katirsan shirkadayada, silsiladdayada sahayadeed, macaamiishayada iyo bulshooyinkayaga. U ogolow mabaadi'daan inay hagaan go'aamadaada maalinlaha ah kaana caawiyaan sida aad u wajahayso xaaladaha adag.

Waxaan u baahannahay in si daacadnimo ah loogu hoggaansamo mabaadi'daan. Waa masuuliyad adiga ku saaran in aad ogaato oo aad u hoggaansanto dhammaan mabaadi'da, fasiraadda iyo ujeedkaba. Si joogta ah dib ugu eeg, ugu yaraan sanadkiiba mar, iyada oo aan loo eegaynin booska aad ka haysato ururkayaga.

Ma jiro wax dukumeenti ah oo ka hadli kara dhammaan xaaladaha aad la kulmi karto. Haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo, ama haddii aad aragto dabeecado ka hor imaan kara mabaadiidaan, waxaanu kaa codsanayaa inaad **'Ka Hadasho'.** La xiriir kormeerahaaga, waaxda shaqaalaha ee shirkadaada, ama isticmaal Khadka Caawinta ee Otter Tail Corporation, adigoo wacaya (800) 461-9330, ama qoraal u diraya (218) 394-7272 ama booqo websaydka coc.ottertail.com. Sheegida fikradaada waxay muhiim u tahay inay naga caawiso inaan ilaalino sumcaddaada sida adag aad ku heshay iyo inaan ka dhigno shirkadayada xitaa meesha ugu wanaagsan oo laga shaqeeyo.

Waad ku mahadsantahay inaad igala qaybqaadato balanqaadkayaga si aan shaqadeena ugu gudano si mas'uuliyad leh oo daacadna ah, iyaga oo ay la socoto sharafta ugu sareeysaayi.

XEERKA ANSHAXA GANACSIGA 2023

JADWALKA TUSMOOYINKA

Hordhaca	4
Badqabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada Daroogooyinka iyo Khamriga	4
Goob Shaqo Ixtiraam leh Shaqaalaha	4
Bayaanka Xuquuqda Aadanaha	6
Diiwaanada Ganacsiga	6
Qarsoodiga iyo Macluumaadka Qarsoodiga ah	6
Joogtaynta Ammaanka Macluumaadka	7
Baraha Bulshada	8
Iska-horimaadka Danaha Isweydaarsiyada Ganacsi ee Dhinacayada Xiriirka Leh	8
Kaalmooyinka Siyaasadeed	10
Sharciyada iyo Xeerarka	10
Ganacsi Dhagareedka	11
Kahortagga Aaminaada	12
Wadaxiriirka Hal-dhinachaha ah	12
Xakameynta Dhoofinta	13
Fal Dambi ah Musuqmaasuqa Lacagta Laaluushka, Musuqmaasuqa, Hadiyadaha, iyo Madadaalada Khayaano	13
Xeerka Musuqmaasuqa Shisheeye (FCPA)	14
Hantida Shirkadda iyo Asturnaanta	15
Xadgudubyada Iyo Baaritaanada	15
Aargoosashada	15
Ka Hadalka	15
Guud Ahaan	16

HORDHACA

Otter Tail Corporation iyo shirkadaheega ka hoos shaqeeya (si wadajir ah iyo si shakhsi ahaan ah "Shirkadda") waxay aaminsan yihiin in sharafnimo iyo daacadnimo ka jirto dhammaan xiriirrada goobta-shaqada. Go'aannada aan gaarno iyo ficillada inaga dhaxeeya iyo kuwa aan u qaadanno macaamiishayada ayaa aad muhiim ugu ah joogteynta sumcaddeena aan dadaal badan ugu galnay inaan kasbano.

Alaab-qeybiyeyaasha, iibiyeyaasha, iyo qandaraaslayaasha wada shaqaynta la leh shirkadda ayaa sidoo kale la filayaa loogana baahan yahay inay shaqada u gutaan si waafaqsan shuruucda, qawaaniinta, iyo xeerarka khuseeya. Xeerkani Anshaxa Ganacsiga ayaa khuseeya dhammaan kuwa u shaqeeya ama bixiya adeegyada ama baddeecooyinka Shirkadda. Ficilada alaab-qeybiyeyaashayada, iibiyeyaashayada iyo qandaraasleyaasheena ayaa waxay ka turjumayaan cidda aynu nahay. Waxaan rabnaa dadka iyo shirkadaha aan ganacsiga la sameyno inay ka tarjumaan qiyamyadayadeena isla markaana ay nagala shaqeeyaan u hoggaansamida Xeerka Anshaxa Ganacsiga.

Xusuusnow inay niyad wanaagsanida, rabida inaad caawiso Shirkadda, ama aqoon la'aanta xeerarkaan ku siin doonin cudurdaar dhaqan anshax xumo ah ama sharci daro ah inaad ku kacdo. Qaar ka mid ah shuruucda federaalka iyo gobolka ayaa kugu xukumaayo inaad mas'uul ka tahay anshax xumada shakhsi ahaaneed ama anshax xumada shirkadeed, waxaana laga yabaa in aqoon darrada sharciga aysan noqon cudurdaar.

Adigoo ah agaasimaha, sarkaalka, ama shaqaalaha shirkadeena, waxaa waajib kugu ah inaad akhrido siyaasaddaan aadna raacdo mabaadi'deeda dhaqanka. Haddii aad qabto wax shaki ah ama su'aalo ah oo ku saabsan Xeerka Anshaxa Ganacsiga ama xaalad hoos imaanaysa xeerka, fadlan weydii kormeerahaaga ama waaxda shaqaalahaee shirkaddaada.

QEEXITAANKA

Anshaxa Ganacsiga

Anshaxa Ganacsiga waa mabaadiida maamulaya hab-dhaqanka ururka marka la eego sharciga iyo qawaaniinta. Anshaxa khuseeya ganacsigu wuxuu salka ku hayaa qaab-dhismeedka sharciga iyo qawaaniinta uu ku shaqeeyo. Xukunka ganacsiga waa awooda lagu gaari karo go'aamo macquul ah iyadoo la sameynaayo tixgalino istiraatijiyadeed iyo kuwa xeeladeed. Go'aamada anshaxu waxay ku lug leeyihiin tixgelinno anshaxeed oo ku salaysan qiyamyada ururkayaga.

Ma qabtaa su'aalo ku saabsan Xeerka Anshaxa Ganacsiga, su'aal ku saabsan u hoggaansanaanta ama siyaasadda, ama su'aal ku saabsan xaalad aad ku lug leedahay? Waxaad isticmaali kartaa bogga Khadka Caawinta ee Otter Tail Corporation oo ah, coc.ottertail.com, si aad "Su'aal u Weydiiso".

BADQABKA IYO CAAFIMAADKA GOOBTA SHAQADA

Waa inaan ka wada shaqeynaa si aan u dhiiri gelino goob shaqo oo badbaado iyo caafimaad leh. Shirkaddayadu waxay ku qiimeeysaa shaqaalaheeda inay yihiin hantideeda ugu muhiimsan waxayna ballanqaadaysaa heerar badqab oo sareeya si ay u ilaaliso shaqaalaheeda iyo dadweynaha. Mid kasta oo naga mid ah waxay mas'uuliyad ka saaran tahay inaan fulino ballanqaadkaan iyada oo la raacaayo dhammaan nidaamyada badbaadada iyo amniga ee Shirkadda, iyo sidoo kale sharciyada iyo xeerarka khuseeya. Marka sidaas la sameeyo, waxaan nafteena iyo kuwa nagu wareegsanba ka fogaaneynaa halista. Haddii aad ogaato xaalado shaqo oo aan ammaan aan ahayn, gaadhsii xaalada kormeerahaaga ama maamulahaaga isla markiiba.

Gudaha Otter Tail Corporation, badqabka ayaa ah mudnaantayada koowaad isla markaana safka hore ah wax walba oo aan qabanno. Waxaa dhammaanteen mas'uuliyad naga saaran tahay inaan qaadno tallaabooyinka dheeriga ah ee lagama maarmaanka ah si aan u hubinno in qof kasta guriga ku laabto dhaawac la'aan maalin kasta.

Daroogooyinka iyo Khamriga

Waxaa lagaa filayaa inaad shaqada shirkadda qabato adigoo ka madax bannaan saamaynta wax kasta oo wax u dhimaya waxqabadkaaga shaqo. Waxaa lagaa filayaa in aad qaadato go'aan wanaagsan aadna is-xakameyso marka khamri lagu bixiyo munaasabadaha Shirkadda ama xafladaha ganacsiga. Shirkadda waxay goobahayaga shaqada ka mamnuucdaa iibinta, samaynta, isticmaalka, ama qaybinta mukhaadaraadka sharci darrada ah. Xeerarkani waxay wakhtiyo kasta khuseeyaan dhammaan dadka ku jira dhismayaasha Shirkadda, oo ay ku jiraan alaab-qaybiyeyaasha, iibiyeyaasha, ama qandaraasleyaasha.

GOOB SHAQO OO IXTIRAAM LEH

Waxaa naga go'an inaan joogtayno goob shaqo iyo dhaqan ka madax bannaan takoor iyo dhibaato. Waxaa naga go'an inaan siinno dhammaan shaqaalaha fursadaha hormarka oo loo siman yahay iyadoo aan la eegaynin jinsiyada, midabka, qowmiyadda ama aslaka qaran, da'da, diinta ama caqiidada,

jinsiga, qaabka jinsiga, jinsiyada, nooca jinsiyada, wadanka dhalasho, xaalada socdaalka, muwaadinimada, abtirka, xaalada guurka, uurka, naafanimada, xaalada militarinimo ama halyeeyga, naafanimada jireed ama mida maskaxeed, macluumaadka ama astaamaha hidde-sidaha, ama astaamaha kale ee uu sharcigu ilaaliyo.

Uma dulqaadano faraxumeyn ama dhibaateyn nooc kasta ah. Mid kasta oo naga mid ah wuxuu u arki karaa dhibaataynta si ka duwan mid kasta oo naga mid ah. Waxay abuurtaa ama gacan ka geysataa jawi aan raaxo lahayn, dambi ah, ama cabsi gelin leh. Dhibaataynta waxay noqon kartaa mid dhaqdhaqaaq, hadal, muuqaal, ama qoraal ah.

Faraxumeyntu waa nooc takoor ah oo ka koobnaan karta hadal, muuqaal, ama dhaqan jireed oo galmo la xiriira, kaasi oo aan la jecleysan, ama qofka ku ridaya raaxo darro. Waxay noqon kartaa noocyo badan, sida:

- Codsasho galmo, codsiyo ku saabsan daneysi galmo, ama dalabaadyo shukaansi oo aan la jecleysan.
- Kaftanno, sawirro, qoraal, ama fariimo iimayl oo quseeya galmo.
- Faalooyin cad ama sharaf-dhac ah oo ku saabsan muuqaalka.
- Muujinta sawirro soojeedin galmo ah ama sawirro qaawan.

Faraxumeyni wax boos ah kuma lahan ganacsigeenna mana loo dulqaadan doono.

Ha u ogolaan in dhibaateyn noocay dooniba ha noqotee ay sii socoto oo aadan soo sheegin, iyada oo aan la eegaynin cidda si xun u dhaqmaysa. Haddii aad aragtid ama aad la kulantid dhibaateyn, waa masuuliyad ku saaran inaad si dhakhso ah u sheegtid.

Maareeyayaasha ama kuwa jagada kormeerka haya waa in ay hubiyaan in shaqaalaha ay soo sheegaan dhibaateynta ayna si degdeg ah wax uga qabtaan wixii walaacyo ah ee la soo sheegay.

DHACDO

Dhawaan mid ka mid ah dumarka aan wada shaqeyno ayaa xanaaqay markii naag kale oo kooxdayada ka mid ah ay u sheegtay kaftan galmo ku saabsan. Kaftanka noocaan ah waxba uma arko. Miyaan sugaa in qofta aan wada shaqeyno ay hadasho?

Waa in aad tallaabo qaaddaa. Dhibaateynta la xiriirta galmada/faraxumeynta waxaa loo geysan karaa qof oo qofka geysanaayo isku jinsi yihiin ama kala jinsi yihiin. Intaa waxaa dheer, faallada waxay noqon kartaa mid meel ka dhac ku ah qofka marka lagu saleeyo caqiidadiisa diineed. Haddii ay cadahay in qofta aad wada shaqeysaan xumaatay, waa inaad ku dhiirigelisaa inay arrinta kala hadasho qofta aad isla shaqeysaan ee iyada xumeysay si ay ugu sheegto inaysan soo dhawaynayn kaftankeeda. Haddii qofta aad wada shaqeysan ay ka caga-jiideyso, la hadal maareeye ama qof katirsan waaxda shaqaalaha. Waxaa naga go'an inaan joogteyno jawi shaqo oo sharaf iyo ixtiraam u leh dhammaan shakhsiyaadka.

QEEXITAANKA

Bayaanka Kala-duwanaanshaha ee Shirkadda Otter Tail

Waxaan filaynaa oo naga go'an kala-duwanaanshaha, sinnaanta, iyo kamid ahaanshaha waxayna kuwani qayb ka yihiin cidda aanu nahay, waxa aan qiimayno, iyo sida aan u gaarno guusha shaqsiyeed, mida ganacsiga, iyo mida bulsheada.

Shaqaalaha

Waxa naga go'an inaan dhisno xiriiro ixtiraam leh oona abuurno jawi ay dhammaan dadka sare u qaadaan xirfadahooda. Shaqaale kasta wuxuu istaahilaa inuu ku shaqeeyo jawi ka madax bannaan takoorid iyo dhibaateyn, halkaasi oo shakhsi kasta loola dhaqmo si xushmad iyo sharaf leh.

Xushmadda waxaa ka mid ah:

- **Aqbalida in dadka kale ay leeyihiin fikrado kala duwan.**
- **Qiimaynta waxtarka dadka kale iyadoon loo eegin doorka.**
- **Qadarinta hantida iyo danaha shakhsi ahaaneed ee dadka kale, iyo sidoo kale shirkadda.**
- **Aqbalidda baahiyaha iyo rajooyinka kormeerayaasha iyo maamulka.**

Waxaan bixinaa siyaabo shaqaaluhu ay jawaab celinta ku saabsan xadgudubyada sharci iyo anshaxa ku siiyaan maamulka iyaga oo aan ka cabsanayn aargoosi. Waa siyaasadeena inaan si taxaddar leh dib ugu eegno oo aan si habboon uga jawaabno warbixinnada sheegaayo in aysan Shirkadda gudanin waajibaadkeeda sharciga ah ama anshaxa ah, oo ay ku jiraan waajibaadkeena ku xusan Xeerkaan Anshaxa Gancasiga. Khadkayaga Caawinta waxaa heli karaa dhammaan agaasimayaasha, madaxda, shaqaalaha, alaab-qaybiyeyaasha, iibiyeyaasha, iyo qandaraasleyda.

Waxaan si adag ugu dadaalnaa inaan bixino jawi shaqo oo badbaado leh ammaan ah. Waxaan u hoggaansanaa

sharciyada iyo xeerarka jira waxaana shaqaalaha barnaa wax ku saabsan badqabkayaga, amniga, iyo sidoo kale ixtiraamidda dadka kale.

BAYAANKA XUQUUQDA AADANAHA

Shirkadda waxay ixtiraamtaa oo hormarisaa xuquuqda aadanaha. Waxaan ku dadaalnaa inaan bixino dhaqano shaqo oo mas'uulnimo leh, badqab ah, isla markaana waara marka la eego dhammaan dhinacyada ganacsiyadayada mana shaqaalayno ilmo, addoon, ama shaqaale xiran. Waxaan qiraynaa xorriyadda xiriirka iyo gorgortanka wadajirka ah ee shaqaalahayaga. Shaqaalaha, iyagoon kala soocnayn, waxay xaq u leeyihiin inay ku biiraan ama sameystaan ururo shaqaale oo ay iyagu doortaan iyo inay si wadajir ah u gorgortamaan. Xeerkeena Anshaxa Ganacsiga wuxuu qeexayaa go'aankayaga ah in si caddaalad iyo sinnaan ah loola dhaqmo dadka oo dhan iyo in shaqada loo guto si anshax leh.

DIIWAANADA GANACSIGA

Waxaa iyadoo la raacaaya sharciyada dammaanadaha ee federaalka na looga baahan yahay inaan muddo kadiba shaacin ku saabsan ganacsigeena iyo xaaladdeena maaliyadeed diyaarino oo aan u gudbino ama u bandhigno Guddiga Dammaanadaha iyo Sarifka (Securities and Exchange Commission, "SEC"). Waxaan sidoo kale macluumaadka la gaadhsiiyaa dadweynaha iyada oo ah warbixinnada hadda ah iyo warsaxaafadeedyo. Sida ay laasimayso masuuliyada jagadaadu, waa inaad hubisaa in macluumaadka aad na siiso ee aan u isticmaalno diyaarinta ama faafinta

QEEXITAANKA

Diiwaanka Ganacsiga

Diiwaanka Ganacsiga waa dukumiinti diiwaangelinaaya macaamilka ganacsiga. Diiwaanada ganacsiga waxaa ka mid ah, laakiin kuma xaddidnee, diiwaanada xisaabaadka, waxyaabaha looga hadlay kulanka, fariimaha xusuusinta, qandaraasyada, warbixinnada bay'ada, macluumaadka alaabada, diiwaanada xaqiijinta tayada, diiwaanada waqtiga shaqaalaha, iyo wixii kaloo xog ah ee la xiriira dhaqamada ganacsiga. Diiwanada waa inay noqdaan kuwa dib loo heli karo taariikh dambe si markaa macaamilka ganacsiga si sax ah dib loogu eegi karo haddii loo baahdo.

shaacintaan, haddii ay tahay mid dhaqaale ama haddii kale, uu yahay mid dhammeystiran, cadaalad ah, sax ah, waqtigiisa la joogo, lana fahmi karo.

Warbixinta maaliyadeed ee saxda ah waxay u baahan tahay inaan:

- **Kuwo ku dadaala ka warbixinta deymaha iiyo rasumaalka la ogyahay iyo la qiyaasi karo – innagoo hoos u dhigin ama badin.**
- **Raacno Mabaadi'da Xisaab-haynta la Aqbali Karo (Generally Accepted Accounting Principles, "GAAP") aana ku xad-gudubin GAAP innagoo dardargelinayno ama dib u dhigeyno kharashyada. Si habboon u joogteyno dukumiintiyada taageeraya isweydaarsiyada ganacsiga.**
- **Marnaba wax ka beddelin dalabaadka, iibinta, ama shixnadaha si aan sicir bararin ama sicir jabin ugu sameyno iibka saddex-biloodlaha ama sannadlaha ah.**

Waa inaadan waligaa been abuurin ama aad wax ka beddelin ganacsiga ama diiwaanada xisaabinta ama qorista. Marnaba ha qaldin ama si u qasad ah ha uga saarin diwaanka Shirkadda wax xaqiiqo ah ama ah macluumaad loo baahan yahay si diiwaanka looga dhigo mid sax ah ama waaqici ah ama haddii kale looga baahan yahay sharciga iyo xeerka khuseeya.

Waa inaad u hogaansantaa nidaamyadaa Shirkadda ee bixinaya waraaqaha iyo nidaamka kaydinta macluumaadka saxda ah ee haboon ee koontiyda kharashka baxay iyo lacago-celinta. Dhammaan warbixinnada xisaabeed iyo diiwaangelinta, oo ay ku jiraan waraaqaha xoojinta, waa inay si sax ah u muujiyaan oona tusaan macaamil ganacsiyeedka khuseeya.

QARSOODIGA IYO MACLUUMAADKA QARSOODIGA AH

Macluumaadka ku saabsan macaamiisha, alaab-qeybiyeyaasha, xiriirada ganacsiga, qandaraasyada, baddeecadaha, qorshayaasha, istaraatijiyadaha, wax soo saarka, suuq-geynta, dhaqaalaha, iyo hantida waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin macluumaadka Shirkadda ee qarsoodiga iyo sirta ah ("Macluumaad Qarsoodi Ah"). Agabyada aan ahayn macluumaadka loo oggol yahay dadweynaha, ee lagu qeexay qaybta Ganacsiga Dhagareed, ayaa sidoo kale ah in loo tixgeliyo inay yihiin Macluumaad Qarsoodi ah.

Macluumaadka Qarsoodiga ah waa in lagu hayaa sida ugu qarsooni badan inta lagu jiro iyo wixii ka danbeeya

DHACDO

Dan wuxuu ka shaqeeyaa kooxda iibka. Carmen oo ah madaxa Dan ayaa waxay leedahay xaflad dhalasho maanta. Dan waxaa uu la sheekeysanayay macmiil, Enrique, wuxuuna ku hawlanaa hadal aan muhiimad weyn lahayn. Waxa uu u sheegay Enrique in ay maanta ahayd dhalashadii Carmen ayna gaartay 40 sano jir. Goor dambe maalintii Dan waxaa uu helay iimayl ka yimid Enrique oo ka codsanaya ciwaanka Carmen. Enrique waxa uu rabay in uu Carmen u diro hadyad wuxuuna u baahday ciwaankeeda. Dan wuxuu eegay cinwaanka guriga Carmen wuxuuna u diray Enrique. Maxay ahayd in Dan uu sameeyo si sidaa ka duwan?

Dan si aan ula kac ahayn ayuu u bixiyay Macluumaad Qarsoodi ah. Dhalashada Carmen iyo ciwaanka gurigeeda waa Macluumaad Shakhsiyeed oo lagu Aqoonsan karo. Beddelkii uu Enrique siin lahaa macluumaadkaan waxa ay ahayd inuu si fiican uga fikiro nooca macluumaadka uu bixinaayo oo uu u sheego Enrique inuu wixii hadyad ah ku soo dira goobta xafiiska.

marka shaqada Shirkadda laga tago. Mid walba oo idinka mid ah wuxuu mas'uul ka yahay ilaalinta Macluumaadka Qarsoodiga ah. Waa inaan xusuusanaa in wixii khasaare ah ee ka yimaada shaacinta aan loo qasdin ee Macluumaadka Qarsoodiga ah (sida ku wadasheekeysiga wiishashka, makhaayadaha, ama goobaha kale ee bulshada) uu noqon karaan mid aad u daran oo la mid ah shaacinta loo qasday. Intaa waxaa dheer, xogta la ilaaliyay sida Macluumaadka Caafimaad ee la Ilaaliyay iyo Macluumaadka Shakhsiga lagu Aqoonsan karo (Macluumaadka Caafimaadka ee la Ilaaliyay iyo Macluumaadka Shakhsiga lagu Aqoonsan karo labadaba waxaa si wadajir ah loogu yeeraa "Xogta la Ilaaliyay") waa in loola dhaqmo si la mid ah Macluumaadka Qarsoodiga ah.

Caadiyan dunida aan ku nool nahay, xogta waligeed waa la helaa. Waxaan ururin karnaa xog ku saabsan macaamiisha, adeegteyaasha, alaab-qeybiyeyaasha, shaqaalaha, iyo saamilayda. Xogta noocan oo kale ah waxay u baahan tahay ilaalin mar kasta. Tusaaleyaasha noocaan ah ee Macluumaadka Qarsoodiga ah waxaa ka mid noqon kara macluumaadka xiriirka, cinwaannada guryaha, lambarada teleefoonada, lambarada amniga bulshada, macluumaadka maaliyadeed, xogta shaqada, iyo wixii ah macluumaad caafimaad.

Uma isticmaali kartid Macluumaadka Qarsoodiga ah si aad u heshid faa'iido gaar kuu ah. Waa inaadan kala hadalin Macluumaadka Qarsoodiga ah qof walba oo ka baxsan Shirkadda, oo ku jiraan qoyska ama saaxiibada. Waa inaad ku xaddidaa shaacinta Macluumaadka Qarsoodiga ah dadka xaqqa u leh inay helaan macluumaadkan qarsoodiga ah, marka laga reebo marka ay tahay shaacinta mid si rasmi ah loo fasaxay ama sharci ahaan loo baahan yahay. Waa inaad sidoo kale ku kaydisaa waraaqaha muhiimka ah meelo ammaan ah aadna ku kaydisaa warqadaha, xasuus-qorka, iyo heshiisyada meel aan la arki karin. Ma isticmaali kartid Macluumaadka Qarsoodiga ah oo shirkad kale. Marka lagu shaqaaleysiiyo, waa inaadan la imaan macluumaad qarsoodi ah oo uu leeyahay loo-shaqeeyahaagii hore.

Siyaabaha aan ula xariirno daneeyeyaasheenna waxay aad muhiim ugu yihiin guusheena socota. Sidaa daraadeed, su'aalaha ku saabsan shirkadeena waa in la gaadhsiiyo qofka ku haboon si jawaab looga helo.

- Su'aalaha ka yimaada daneeyeyaasheenna/qayb-lahaashayaasheena waa in lagu hagaajiyaa Adeegyada daneeyeyaasheenna/qayb-lahaashayaasheena (800) 664-1259.
- Su'aalaha ka yimaada hay'adaha dawladda waa in la gaadhsiiyaa La-taliyaha Guud (218) 998-7144.
- Su'aalo ka yimaada warbaahinta iyo dhammaan su'aalaha kale waa in la gaadhsiiyaa Agaasimaha Isgaarsiinta Shirkadda (218) 739-8535.

Haddii aad joogto qaybta shaqada ee shirkad, waa inaad sidoo kale u sheegtaa maamulahaaga ama kormeerahaaga mid kasta oo ka mid ah xaaladahaan.

JOOGTAYNTA AMMAANKA MACLUUMAADKA

Ammaanka macluumaadka wuxuu u baahan yahay inaad fejignaato oo aad ka warqabto meesha macluumaadka Shirkadda lagu keydiyo, tillaabooyinka loo baahan yahay si loo ilaaliyo, iyo inaad taxaddar muujiso marka aad dirayso ama dadka la wadaagayso wixii ah macluumaad ay Shirkaddu leedahay. Waa muhiim inaad raacdo siyaasadaha Shirkadda ee ku saabsan ammaanka macluumaadka kuwaasi bixinaya hagitaan qaas ah oo ku saabsan:

- Ilaalinta Macluumaadka Qarsoodiga ah, oo ay ku jiraan kala soocida macluumaadka iyo ubeddelida xogta koodhka la xariirta;
- Keed-ka-haynta dukumiintiyada iyo gelitaanka dhismayaasha;
- Borotokoolada/nidaamyada baaswoodhka;
- Shuruudaha qandaraaska ee lagu ilaalinaayo macluumaadka Shirkadda ee ku jira gacanta dhinacyada saddexaad; iyo
- Amniga internetka iyo borotokoolada/nidaamyada amniga marka la isticmaalayo imaylka.

Haddii aad ka shakisan tahay in lagu xadgudbay sirta ama nidaamyada macluumaadka Shirkadda, isla markiiba u sheeg dhinacayada ku habboon (sida, Waaxda Teknoolojiga ee Shirkadda) oo raac qorshaha ka jawaabista dhacdada ee shirkadda. Ku xadgudubka asturnaanta iyo amniga waxaa ka mid ah bixinta ama meel uga dhicida aan la fasaxin ee Xogta La Ilaaliyay, macluumaadka qarsoodiga ah, luminta dhabta ah ama macquulka ah ee xogta qarsoodiga ah ama dukumintiyada, luminta qalab kasta oo leh macluumaadka shirkadda, ama ku xadgudubka nidaamyada ammaanka ee shirkadda.

BARAHA BULSHADA

Baraha Bulshada wuxuu noqon karaa hab farxad iyo natiijo leh oo aan nolosheena iyo ra'yigeena kula wadaagno qoyska, saaxiibada, dadka aan wada shaqeeyno, iyo dunida oo dhan. Laakiin, isticmaalka baraha bulshada ayaa sidoo kale leh halisyo wuxuuna u baahan yahay mas'uuliyad gaar ah.

Baraha bulshada waxaa ka mid ah bogaga onlaynka ah ee isgaarsiinta oo ay ka mid yihiin isku-xirka bulshada (tusaale, Facebook-ga, LinkedIn-ka), baloogyada iyo baloogyada yaryar (tusaale, Twitter-ka), sawir iyo fiidiyoow wadaaga (tusaale, Instagram-ka, YouTube-ka), qolalka onlaynka ah, bogaga wararka bulshada iyo goobaha farriimaha (wadajir ahaan loo yaqaan "Baraha Bulshada"). Baraha Bulshadu waxay fududeeyaan is-dhex galka iyo wadaagida aqoonta si fudud. Isgaarsiinta waxay u dhici kartaa si dhakhso ah, waxa laga hadlayana wuxuu si aad oo degdeg u ah ugu faafi karaa meelo fog.

Ugu dambeyntii, annaga ayaa masuul ka ah wixii aan ku dirno interneetka. Kahor inta aan la sameeynin waxa aad internetka ku dirayso, tixgeli halista iyo abaalmarinta ku lug leh. Dhaqanka si xun u saameeya waxqabadka shaqadayada, shaqaalaha, macaamiisha, alaab-qeybiyeyaasha, ama danaha saxda ah ee ganacsiga Shirkadda ayaa wuxuu keeni karaa ficil anshax marin ah. Waa inaadan marnaba shaacinin macluumaad qarsoodi ah ama xasaasi ah. In baraha bulshada lagu wadaago macluumaadka dadweynaha horay loogu shaaciyay ayaa ah wax la aqbali karo.

Ka digtoonow oona raac siyaasadaha iyo nidaamyada Shirkadda ee ku saabsan isticmaalka habboon ee Baraha Bulshada.

Waxa soo socda waa tilmaamo aasaasi ah ee naga caawiya gaarida go'aanno masuul ah oo ku saabsan isticmaalka Baraha Bulshada.

- Isticmaal fikir wanaagsan markaad isku dareeysid noloshaada shaqsiyeed iyo mida shaqada.
- Ilaali dhigaalada iyo sumcadda shirkadda adigoon marnaba wadaagayn Macluumaadka Qarsoodiga ah ee Shirkadda sida lagu qeexay qaybta kore ee Qarsoodiga iyo Macluumaadka Qarsoodiga ah.
- Waligaa ha u hadlin Shirkadda – adigoo ku jira Baraha Bulshada ama meel kasta oo kale – haddii aan laguu oggolaan inaad sidaas samayso.
- Isticmaal jidadka habboon ee Shirkadda si aad u sheegto walaacyadaada ula wadaagto fikradahaaga.

ISKA-HORIMAADKA DANAHA

Waa inaadan ku lug lahayn hawl kasta oo abuuraysa ama bixinaysa muuqaal ah is-khilaafka danaha ee u dhaxeeya danahaaga shakhsiyeed iyo danaha Shirkadda. Iska-horimaadka danaha wuxuu jiri karaa marka aad ku lug leedahay, ama aad maalgalisid hawlo dibada ah ama hawlaha danaha shakhsiyeed kuwaas oo faragelin kara, ama lahaan kara suurtogalnimada ah faragelinta mas'uuliyadaada shirkadda ama saameyn kara ama lahaan kara suurtogalnimada ah inay saameyn ku yeeshaan go'aankaaga ama waxqabadkaaga shaqo. Waa waajibkaaga inaad diiradda saarto Shirkadda aadna u oggolaan in saameyn ka timid dibada aysan qaybin daacadnimadaada. Waa inaad ka fogaataa xitaa muuqaalka is-khilaafka danaha, xitaa haddii aad dareemayso inaad ku kalsoon tahay caddaaladnimada qorshe suuragal ah iyo in qorshe ay suurtagal tahay inuu danaha khilaafayo uu u muuqdo mid aan waxba dhimayn. Is-khilaafka danaha waxaa sidoo kale ka mid noqon kara xiriir jacayl oo lala yeesho dadka aad wada shaqaysaan, kormeer u noqoshada xubno katirsan qoyska ama cid kastoo kale oo laga yaabo in xukunkaaga yeesho tanaasul ama u muuqdo inuu leeyahay tanaasul.

Marka lagu daro hawlahaaga khaaska kuu ah, waa inaad sidoo kale baartaa hawlaha xubnaha qoyskaaga iyo kooxaha

SU'AAL IYO JAWAAB

Ma khilaaf bay keenaysaa?

Isweydii:

- Miyay faragelinaysaa shaqada aan u hayo Shirkadda?
- Miyaan hantida shirkadda, cilaaqaadka, ama booskayga u isticmaalayaa dano qaas ah?
- Miyuu qof kale u arki karaa inay tahay is-khilaaf daneed?
- Miyay la tartamaysaa danaha Shirkadda?

Miyaad "haa" kaga jawaabtay mid ka mid ah su'aalahaan? Haddi ay haa tahay, weydiiso hagitaan. Oggolaansho laga helo maamulka sare ayaa laga yaabaa in loo baahdo. Waxaad u baahan tahay inaad maamulka u soo bandhigto is-khilaafka daneed ee imaan kara.

kale ee saddexaad kuwaas oo aad xiriir muhiim ah ula leedahay xaaladaha laga yaabo inay keenaan iska-horimaadka danaha ama muuqaalka iska-horimaadka danaha. Waa inaad ka fogaato inaad ganacsi la samayso xubnaha kuu dhow ee qoyskaaga iyo kuwa aad xiriir muhiim ah la leedahay adigoo matalaya Shirkadayada. Intaa waxaa dheer, la soco in haddii adiga iyo xubnaha kuu dhow ee qoyskaaga aad ka heshaan dan dhaqaale ama dan kale oo taasi la mid ah shirkad kasta oo alaab ka iibin karta ama ka iibsan karta, u qalabayn karta, ama ka iibsan karta adeegyo Shirkaddayada, tartan kula jirta ama haddii kale ganacsi la leh Shirkaddayada, tani waxaa loo tixgelin karaa inay tahay is-khilaaf daneed. Danaha dhaqaale waxaa ku jiri kara dan lahaansho, ama u shaqaynta lataliye ahaan, sarkaal ahaan, ama agaasime ahaan. Intaa waxaa dheer, waa inaadan uga soo iibin, uga soo kireyn, ama uga soo helin Shirkadda wax baddeecad ama adeegyo kasta ah shirkad aad la leedahay dan dhaqaale (Eeg Macaamiilada/Ganacsiyada Dhinacyada/Dadka ay khuseeysa/lala leeyahay Xiriirka).

Xaaladaha badankood waxaa laga yaabaa in ay adagtahay in la ogaado haddii ay jirto iska-horimaadka danaha oo dhab ah ama suurtogal ah.
Haddii aad ka shakisan tahay in hawl la soo jeediyey ay sababi doonto is-khilaaf daneed oo dhab ah ama suurtagal ah, la xiriir Khadka Caawinta ee Otter Tail Corporation, taleefoon ahaan (800) 461-9330, fariin ugu dir (218) 394-7272 ama kala xiriir websaydhka: coc.ottertail.com, ama la xiriir kormeerahaaga ama waaxda shaqaalaha.

Isweydaarsiyada Ganacsiga ee Dhinacayada Xiriirka Leh

Isweydaarsiyada ganacsi ee dhinacayada xiriirka leh ee u baahan ansixinta degdega ah waxay sababi karaan iska-horimaad dano oo sidaas daraadeed waa la diidaa oo si dhow ayaa loola socdaa. Siyaasadayada Isweydaarsiyada Ganacsi Ee Dhinacayada Xiriirka Leh waxay dhigaysaa in macaamiil ganacsi ama macaamiilo ganacsi oo taxane ah sanadlana ah kuwaas oo lala yeeshay dhinaca xiriirka lala leeyahay laguna qiimeeyay Shan Kun oo Doolar ($5,000) ama ka badan u baahan yihiin oggolaansho hore ee uu bixiyo Madaxweynaha shirkadaada ee hawlgalaayo, sarkaalka dhaqaalaha shirkadda ee hawlgalaayo, iyo Madaxa Dhaqaalaha shirkadda Otter Tail Corporation. Waa in dib loo eegaa lana ansixiyaa sanad walba wixii ah macaamiil ganacsi oo socda oo lala yeeshay dhinaca xiriirka lala leeyahay kaasi oo lagu qiimeeyay Shan Kun oo Doolar ($5,000) ama ka badan. Iyadoo la raacaayo sharcigayaga iska-horimaadka danaha, isweydaarsiga ganacsiga ee dhinacayada xiriirka leh waa inuu lahaado ujeeddo ganacsi oo sharci ahaan banaan, wadahadal dheer laga wada yeesho, haddii ay habboon tahayna, uu lahaado hab tartan ah oo loogu talagalay baddeecada ama adeegyada. Sidoo kale waa inuu tixgeliyaa waajibaadyada shaacinta suurtogalka. Ujeeddooyinka siyaasaddaan awgood, isweydaarsiga ganacsiga ee dhinacayada xiriirka leh waa macaamiil kasta ama macaamiilo taxane ah oo loogu talagalay baddeecado ama adeegyo ku lug leh shirkadda iyo:

- Shaqaalaha.
- Xubnaha qoyska shaqaalaha ee ugu dhow.
- Shirkad, LLC, Shirkadda Sharci ahaan Xor ka ah Dadka leh, Shuraako, ama hay'ad kale oo ay leedahay, ama taas oo mid ka mid ah kuwa kor ku xusan uu ku leeyahay dulsaar waxtar leh oo ah in ka badan boqolkiiba toban.

Fadlan tixraac Siyaasadda Isweydaarsiyada Ganacsiga ee Dhinacacyada Xiriirka Leh ee ku jiro UKG Pro ama Otter Connect, ama waxii faahfaahin dheeraad ah kala tasho kormeerahaaga ama maamulahaaga sida ku habboon.

DHACDO

Maareeyaha mashruuca ahaan, waxaan jeclaan lahaa in Shirkaddu ay qalabka dhismaha qandaraas kala gasho shirkadda ninka hooyadey qaba ee kireynta qalabka dhismaha. Qalabka uu kireeyo wuxuu ka qaalisan yahay shirkadaha la tartamaya ee deegaanka, laakiin waxaan ogahay in uu tayadiisu sareyso, shirkadiisuna ay bixiso adeeg macaamiil oo heer sare ah. Qadarka qalabka la kireeynaayo wuxuu noqonayaa ilaa $3,000. Si kastaba ha ahaatee, lacagtani ayaa labalaabmi karta iyadoo ay ugu wacan tahay baahiyada aan la saadaalin karin ee shirkadda iyo mashaariicda. Waxaan u maleeyaa inay tani u fiicnaan laheyd Shirkadayada, laakiin sideen ku hubin karaa inaan u hogaansanahay siyaasadda isweydaarsiyada ganacsiga ee dhinacayada xiriirka leh?

Macaamiilada ganacsi ee lala sameynaayo dhinacyada xiriirka lala leeyahay waa in lagu galaa qaab lagu eegaayo danta shirkadda, oo ay ku jirto tartan-qiimo gelid markii ay habboon tahay. Kala hadal maareeyahaaga is-khilaafka danaha ee ka iman kara. Adeegso shuruud ujeedo si aad isku barbar dhigto iibyeyaasha kala duwan ee la heli karo. Sidoo kale, maadaama aadan ogeyn inta is-xigxiga isweydaarsiga ganacsiga noqon doono, waa inaad dhanka taxaddarka u badataa oo aad oggolaansho hore ka heshaa Madaxweynaha shirkadaada ee hawlgalaayo, sarkaalka dhaqaalaha shirkadda ee hawlgalaayo, iyo Madaxa Maaliyadeed ee Otter Tail kahor intaysan Shirkaddu galin isweydaarsiga ganacsgai.

DHACDO

Bill waa xubin ka tirsan xisbi siyaasadeed wuxuuna doonayaa inuu dhaqaale u uruuriyo musharaxa xisbigaan. Wuxuu ogyahay in dhawr shaqaale oo kale oo ka tirsan waaxdiisa ay qabaan aragtiyo siyaasadeed oo kuwiisa la mid ah. Waxay kulmeen oo ay abaabuleen qado-sharaf wakhtiga shaqada Shirkadu. Waxay qabanqaabiyeen in musharaxa uu ka soo qaybgalo qado-sharafta si lacag loogu uruuriyo oo loo taageero ololaha musharaxa. Qado-sharafta ayaa lagu qaban doonaa goob Shirkadda leedahay, kharashka ka qayb-galkuna wuxuu noqon doonaa $30 saxankiiba. Dhammaan lacagaha soo xarooda waxaa si toos ah loogu hagi doonaa taageerada ololaha musharaxa. Tani miyay xadgudub ku tahay Maalgelinta iyo Ololeynta Siyaasadeed ee Shirkadda Otter Tail Corporation?

Haa, tani waxay xadgudub ku noqoneysaa wax ku biirinta siyaasadda iyo u ololeynta siyaasadda Shirkadda Otter Tail. Otter Tail si toos ah ama si dadbanba uma maalgeliso musharrixiinta xafiisyada siyaasadeed, xisbiyada ama guddiyada siyaasadeed, ama guddiyada siyaasadeed ee loo sameeyay horumarinta musharrixiinta siyaasadda, ha ahaadaan kuwa federaal, gobol, ama kuwa deegaan. Isticmaalka goobaha/dhismaha Shirkadda iyo qabanqaabida qado-sharafeedka wakhtiga shaqo ee shirkadu waa tabarucaad aan la oggoleyn oo aan toos ahayn oo la siinaayo musharraxa, waxayna abuurayaan aragti aan habboonayn oo ah in Shirkaddu taageerayso musharraxa.

SU'AAL IYO JAWAAB

Yaa waayo dhinaca ay khuseeyso?

Dhinaca xiriirka lala leeyahay waxaa kamid ah: xaaska qofka, waalid(-iinta), adeer/abti/eedo/habaryar, carruurta, ilmo aayo/adeer, sodoh iyo sodog, seedi(-yo), dumaashi(-yo), iyo qof kasta oo ku nool guriga ruuxaas (aan ka aheyn kireystaha ama shaqaalaha).

KAALMOOYINKA SIYAASADEED

Adiga – oo adeegsanaysid awoodaada shaqsi ahaaneed oo aadaan adeegsanayn doorkaaga shaqaalanimada, sarkaalnimada, ama agaasanimada Shirkadda – ayaa waxaad xisbiyada iyo murashaxiinta siyaasadeed ku taageeri kartaa dadaalkaaga iyo dhaqaalahaaga. Caddee in aragtiyadaada ay yihiin kuwaaga oo aysan ahayn kuwa Shirkadda. Shirkadda waxaa ka go'an inay u hoggaansanto dhammaan sharciyada iyo shuruudaha warbixinta ee khuseeya dhaqaalaha ololaha iyo maalgelinta siyaasadeed ee shirkadda. Waa inaad u hoggaansantaa dhammaan sharciyada iyo qawaaniinta xaddidaya in dhaqaale shirkadeed loo isticmaalo ujeedooyinkan. Shirkadda kuma kharash gareeyso khayraadkeeda ama taageeradeeda xisbi siyaasadeed ama musharax. Sidaa daraadeed, Shirkadda ma u soo celin karto mana u soo celin doonto ama qayb kama qaadan doonto dadaalkaaga ama kharashyadaada adigoo metelaya xisbiyo siyaasaddeed ama musharaxyo. Waa inaad iska ilaalisaa muuqaalka iska-horimaadka danaha shirkadda marka la caawinaayo musharixiinta kuwaas oo laga yaabo inay si toos ah xeerar xakameyn ugu dejiyaan Shirkadda. Fadlan tixraac xeerkayaga/siyaasadayada Maalgelinta Siyaasadeed iyo Ololaynta haddii aad ka fikirayso inaad lacag ku bixiso ololo siyaasadeed. Siyaasaddani waxaa laga heli karaa www.ottertail.com//about us/sustainability/Political-Contributions Report, iyo sidoo kale UKG Pro — People Assist/Your Company: Policies/Political Contributions/Lobbying Policy and Otter Connect resources.

Maalgelinta/Tabarucaadka Siyaasadeed waa (a) wax kasta oo waxtar leh, hadiyad, deyn, gudbin, dhigaal, lacag, ama qaybinta lacag ama wax kasta oo qiimo leh oo saameyn ku yeelan kara doorashada, oo ay ku jiraan lacagaha la siiyo musharaxa siyaasadeed; (b) kala wareejinta dhaqaalaha ee dhex mara guddiyada siyaasadeed; ama (c) lacag uu bixiyo qof aan ahayn musharrax oo la siiyo musharax ama guddi siyaasadeed.

SHARCIYADA IYO XEERARKA

Shirkadayada waa inay ku shaqeysaa si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka khuseeya ee heerarka federaalka, dowlad goboleedka iyo deegaanka. Waa inaad u fulisaa waajibaadkaaga adigoo ah agaasime, sarkaal, ama shaqaale si ugu waafaqsan sharciyada federaalka, dawlad goboleedka, iyo deegaanka. Waxaa naga go'an inaan:

- Joogtaynta jawi shaqo oo badbaado iyo caafimaad leh.
- Horumarinta goob shaqo oo aan lahayn takoor ama dhibaateyn.

- Taageerida tartan cadaalad ah iyo sharciyo mamnuucaya xakamaynta ganacsiga iyo dhaqamada kale ee ganacsiga ee aan caddaalad ahayn.
- U fulinta hawlaheena si anshax leh oo waafaqsan dhammaan sharciyada bii'ada ee khuseeya.
- Mamnuucida lacag-bixinta sharci-darrada ah, hadiyado, ama deeq-lacageed oo la siiyo dhinac saddexaad, oo ay ku jiraan mas'uuliinta dowladda iyo xisbiyada siyaasadeed.
- Mamnuucida isticmaalka aan la fasaxin, dib-u-soo saarida, ama qaybinta sirta ganacsiga oo cid kale la siiyo, macluumaadka xuquuqda dhawrsan, ama macluumaadka qarsoodiga ah.
- U hoggaansamida dhammaan sharciyada dammaanadaha ee federaalka iyo dowlad goboleedka ee khuseeya.

Haddii aad ka welwelsan tahay wixii ku saabsan sharciyada ficilka aad ku dhaqaaqi rabto adigoo wakiil ka ah Shirkadeena, fadlan la xiriir Waaxda Sharciga ee Shirkadda Otter Tail Corporation.

GANACSI DHAGAREEDKA

Waa inaadan si toos ah ama si dadban uga ganacsanin damaanadaha Otter Tail Corporation ama shirkad kale adigoo ku salaynaayo macluumaadka qarsoon oo aad ku heshay jagada shaqadaada. Intaa waxaa dheer, waa inaadan siinin walxaha macluumaadka oo aan loogu talagelin dadweynaha dadka kale ee laga yaabo inay ka ganacsadaan dammaanadaha Otter Tail Corporation ama kula la-taliyaan dadka kale inay iibsadaan ama gadaan dammaanadaha Otter Tail Corporation iyagoo ku salaynaayo macluumaadka aan loogu talagelin dadweynaha. Sidoo kale waxaa sharci-darro in laga ganacsado dammaanadaha shirkad kale (sida mid la rejeynaayo in Shirkadayada ay iibsato, mid macmiil inoo ah, ama mid alaab inaga iibiso) taasi oo saamiyadeeda ama dammaanadaheeda kale ay dadweynuhu iibsadaan.

QEEXITAANKA

Walxaha Macluumaadka ah ee aan loogu talagelin Dadweynaha

Walxaha Macluumaadka ah ee aan loogu talagelin Dadweynaha (Material Non-public Information, "MNPI") waa macluumaad kasta, oo guud ahaan dadweynuhu ogayn, kaas oo maalgashade macquul ah uu arko in muhiim uu u yahay go'aan qaadashada iibinta, gadista, ama haysashada dammaanadaha shirkadda. Macluumaad kasta oo si macquul ah looga filan karo inuu saameyn ku yeesho sicirka dammaanadaha ayaa inta badan loo tixgeliyaa inuu yahay agab, wuxuuna agabka noqon karaa mid fiican iyo mid xun.

Macluumaadka ayaa loo tixgeliyaa inuu yahay MNPI haddii aan si ballaaran loogu faafin dadweynaha iyada oo loo maraayo adeegga warbaahiinta waaweyn ama adeegyada warbaahinta dhaqaalaha, ama iyadoo loo maro ku fayl gareynta macluumaadka noocaan ah Guddiga Dammaanadaha iyo Sarifka ee SEC. Ujeeddooyinka siyaasaddaan awgood, walxaha macluumaadka dhaqaalaha waxaa loo tixgelin doonaa wax u banaan dadweynaha 48 saacadood kadib marka ay Otter Tail Corporation ay sameeyso siidaynta macluumaadka dhaqaalaha ama walxaha kale ee macluumaadka ee ah saddex biloodlaha iyo dhammaadka sanadka. Ka dib marka la sameeyo siideyn noocaan oo kale ah, ganacsigu wuxuu dhici karaa maalinta saddexaad kadib markay dhammaadaan laba maalmood oo buuxa oo uu isweydaarsiga Nasdaq furan yahay.

Xeerkayaga Anshaxa Ganacsiga oo qura ma uusan mamnuucin ganacsiga dhagareed, balse sidoo kale waa dembi sharcidarro ah. Xukunka ugu sareeya ee qofka lagu helay ganacsi dhagareed lagu rido waa 20 sano oo xabsi dowladeed ah iyo ganaax dhan Shan Milyan oo Doolar ($5,000,000).

Kahor warbixinta dadweynaha, mid kasta oo ka mid ah tusaalooyinka soo socda ayaa noqon kara walxaha macluumaadka aan dadweynaha loogu talagalin:

- Macluumaadka waxqabadka dhaqaalaha, saadaalinta, isbeddellada muhiimka ah ee waxqabadka dhaqaalaha ama hantida lacag caddaan lagu beddeli karo, ama rajooyinka mustaqbalka.
- Arrimaha muhimka ah ee xisaabinta, oo ay ku jiraan dhibaatooyinka dhaqaalaha, cafinada, isbedelka qiimaha hantida, ama kororka kaydka.
- Qandaraasyo waaweyn oo cusub, macaamiisha, ama ilaha dhaqaalaha, ama khasaaraha.
- Isbeddellada muhiimka ah ama horumarinada ku yimaada alaabooyinka ama khadadka alaabooyinka, ama isbeddellada qiimaha oo weyn.
- Dacwo-oogid dhab ah ama hanjabaad, ficilada sharciyeynta, tallaabooyin wax-ku-ool ah oo laga qaado Shirkadda, ama fayl-gareenta kiiska qiimaha.
- Dhacdooyinka Interneetka ama meesha ka saarida sirta xogta taas oo muujinaysa kharashyada dhaqaalaha ama dhibaatooyinka hawlgalka.

Kuwani waa tusaalooyin kaliya iyo agabyada macluumaadka aan loogu talagalin dadweynahana kuma xadidno xaaladahaan keli. Su'aalaha ku saabsan in macluumaadka yahay walxaha macluumadka oo aan

DHACDO

Becky waa shaqaale ka shaqeeysa hay'ad u adeegta dadweynaha waxayna si joogto ah ula macaamiishaa guddoomiyeyaasha dowlad goboleedka. Shirkadeeda ayay haatan haysataa arin yar (kiis) oo la hor geeyay guddiga. Becky kama warqabto kiiska furan. Guddoomiye kasta wuxuu leeyahay cinwaan imayl oo ay siisay dowlad goboleedka oo lagu daabaco websaydhka dowlad goboleedka. Becky, oo sarkaal sharciyeyn ka ah hay'adda adeegga bulshada, ayaa go'aansaday inay si toos ah imayl ugu dirto mid ka mid ah guddoomiyeyaasha dowlad goboleedka. Becky waxay gudoomiyaha u muujisay fikradeeda ku aadan xisaabinta iyo dejinta sicirka kumeelgaarka ah ee hay'ada u adeegta dadweynaha ee ay ka shaqeyso. Su'aasha/fikrada Becky, in kasta oo aysan si toos ah ula xiriirin, waxay la xiriirtaa kiis furan oo hor yaalo guddiga.

Xiriirkaan ay Becky la sameeysay gudoomiyaha waa xiriir udhaxeeyo qof ku lug leh kiiska iyo garsooraha waana mamnuuc. Aad ayay muhiim u tahay inaad ogtahay waxyaabaha ku jira kiisaska furan iyo inaad ka fogaato mowduucyadaa markaad sameyneyso wada xiriir nooc kasta oo ay yihiinba iyadoon la eegayn sida ay ula xiriiraan kiis natiijadiisa la sugaayo.

dadweynaha loogu talagalin waa in loo jeediyaa Qareenka Guud ee Otter Tail Corporation.

Fadlan tixraac Siyaasada Ganacsiga Dhagareed iyo Fasaxida Kahor ee ku jirta UKG Pro ama Otter Connect, ama waxii faahfaahin dheeraad ah kala tasho kormeerahaaga ama maamulahaaga sida ku habboon.

KAHORTAGGA AAMINAADA

Sharciyada kahortaga aaminaada ama sharciyada tartanka waxay u adeegaan inay macaamiisha ka ilaaliyaan dhaqamada ay shirkadaha iyo shakhsiyaadka kula heshiiyaan la-tartamayaashooda si ay u abuuraan suuq aan caddaalad ahayn. Xadgudubyada kahortaga aaminaada waxaa ka mid noqon kara dhaqamo badan marka lala shaqaynaayo tartamayaasha sida: dejinta qiimaha, xaddididda wax soo saarka ama iibinta, qaybinta aaggaga iibka ama suuqyada, faragelinta tartanka suuqa. Dhammaan waxaa loo sameeyaa in faa'iidooyin loo abuuro shirkadda iyo tartamayaasha labadaba, waxaana caadiyan culeyska qaadayo macaamiisha. Dhaqannada noocaan ah waxay ka soo horjeedaan Xeerka Anshaxa Ganacsiga ee Shirkadda iyo sidoo kale sharciga.

Dawladuhu waxay ciqaabyo iyo ganaaxyo daran iyo sidoo kale cunaqabatayn dembi ku soo rogi karaan shakhsiyaadka ku xadgudba sharciyada aaminaadda.

Shaqaaluhu waa inay had iyo jeer:

- U tartamaan si cadaalad ah. Qiimaha iyo shuruudaha ku saleeyaan tayada iyo adeegga. Aysan marnaba la shaqeyn tartamayaasha si ay u saameeyaan suuqa.
- Ka dhigaan xeeladaha ganacsiga, qorshayaasha, iyo qiimaha kuwa qarsoon la-tartamayaasha.
- Macluumaad kasta oo tartan ah ka helaan ilaha dadweynaha sida joornaalada ganacsiga ama wararka oo aysan ka helin la-tartamayaasha.
- Aad u feejignaadaan marka ay la falgalayaan la-tartamayaasha jooga goobaha ururada ganacsi ama hawlaha kooxaha warshadeed. Kala hadal kormeerahaaga ama Waaxda Sharciga sida loo maareeyo isdhexgalka noocyadaan ah ee suurtagalka ah ka hor inta aysan dhacdada dhicin.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan u-hoggaansanaanta kahortagga aaminaada, la xiriir Waaxda Sharciga.

WADAXIRIIRKA HAL-DHINACLAHA AH

Shirkadayada badanaa waxay qeyb ka tahay dacwadaha la hor geynaayo hey'adaha xakameynta ee gobolka iyo federaalka, kuwaasoo natiijada ka dhalata si weyn saameyn ugu yeelan karto Shirkadayada. Wadaxiriirka hal-dhinaclaha ah waa marka dhinac kamid ah dacwada kala hadlo arrimo ku saabsan kiiskooda go'aan gaareyaasha wakaalada iyadoo dhinacayada kale dacwada aysan joogin. Cawaaqibta ka dhalata wadaxiriirada hal-dhinaclaha ah waxay horseedi kartaa xayiraado, iyo sidoo kale waxyeello soo gaarto sumcadayada iyo xiriirkayaga. Waa inaadan marnaba si aan rasmi aheyn ugala hadlin, hadal ahaan, ama qoraal ahaan, wax walboo muhiim ah oo ku saabsan arrinta la hor geeyay go'aan-gaaraha garsoore, guddoomiye, ama go'aan-qaate kale. Waa inaad sidoo kale muujisaa taxaddar weyn markaad arrimo muhiim ah kala hadlayso hawlwadeenada xakameeyeyaasha dawladda waayo waxaa sidoo kale jiri kara mamnuucis ka dhan ah in iyaga lala hadlo. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid xayiraadahaan, waa inaad la xiriirtaa Waaxda Sharciga si aad u hesho hagitaan.

XAKAMEYNTA DHOOFINTA

Xakameynta dhoofinta iyo xayiraada dhaqaale ayaa xakameeya halka iyo cidda aan ka ganacsan karno. Shuruucda in ka badan hal waddan ayaa maamuli kara hal isweydaarsi ganacsi. Ku guuldareysiga inaad u hoggaansanto sharciyadaan ayaa si xun u saameyn kara Shirkaddaada iyo sumcadeeda, waxay horseedi kartaa ganaaxyo aad u weyn, waxayna xitaa horseedi kartaa luminta mudnaantayada dhoofinta. Iyadoo ugu wacan tahay inaan shixnado badan u dirin caalamka, waxaad u maleyn kartaa in Shirkaddu aysan ku qasbaneyn sharciyada dhoofinta. Xaqiiqdii, waxaan u baahan nahay inaan ka fikirno sharciyadaan iyo xeerarka. “Dhoofinta” waxay dhacdaa marka alaabada ka tallaawdo xuduudaha caalamiga ah oo kaliya kuma koobna shixnadaha baddeecooyinka loo diro wadamada kale, laakiin sidoo kale waxaa ka mid noqon kara wareejinta barnaamij kumbuyuutareedka, xogta, iyo aqoonta teknoolojiyada iyadoo la adeegsanaayo iimayl, teleefoon, fakis, ama diskiga kambuyuutarka. Wadamada qaarkood waxay tixgeliyaan la wadaaga macluumaadka farsamada qof ajnabi ah si uu u dhoofiyo, xitaa haddii macluumaadku uusan waligiis ka bixin dalka. Isweydaarsiyadayada ganacsi waxaa lagu soo rogi karaa xayiraado kala duwan ama xakameynta iyo shuruucda ganacsi ay ka mid yihiin:

- Xakameynta dhoofinta dawladu soo rogto, xayiraado ganacsi, cunaqabateyn ganacsi, cunaqabatayn dhaqaale oo sharci ah, iyo qaadacaad;
- Sharciyada qaadacaada ka dhanka ah ee ka mamnuucaya shirkadaha inay iskaashi la yeeshaan qaadacaad caalami ah aan la ansixin ama ay xayirtay dawladda Mareykanka; iyo
- Xayiraado ay soo rogeen dawlado kala duwan oo dunida ku kala teedsan kuwaasoo mamnuucaya la macaamiilida wadamo, shirkado, ama shaqsiyaad qaarkood.

Waxaa naga go’an inaan xaqiijino in isweydaarsiyadaan ganacsi la fuliyo iyadoo si buuxda loogu hoggaansamaayo xayiraadaha la soo rogay ama xakameynta iyo shuruucda ganacsiga. Haddii aad lug ku leedahay ka talaabinta baddeecooyin ama adeegyo xuduudaha caalamiga ah adigoo matalaya Shirkadayada ama macaamiishayada, waa inaad u hoggaansantaa shuruucdaan, iyadoo aan loo eegin halka aad joogto. Had iyo jeer kala tasho Waaxda Sharciga wixii hagitaan sax ah oo ku saabsan mowduucaan kahor intaadan gelin wax balanqaad dhoofin ah.

FAL DAMBI AH

Falalka dambiga ee ku lug leh shirkadaha dadweynuhu ka ganacsado waa dhibaato caalami ah muhiimna ay tahay inay diirada saaraan fuliyayaasha sharcigu. Waa inaad ka feejignaataa falalka laga shakin karo iyo calaamadaha halista ah. Waa inaad noqataa mid u feejigan fal-dambiyeedyada suurtagalka ah, ha noqoto gudaha ama dibedda shirkadda, oo ay ku jiraan kuwa soo socda.

- Musuqmaasuqa Lacagta - ha noqoto lacag sharci daro ah oo laguna qariyay mid sharci ahaan banaan, ama isticmaalka macaamiilo loogu talagalay fududaynta hawlo sharci-daro ah.
- Laaluushka, Musuqmaasuqa, Hadiyadaha, iyo Madadaalada - oo ay ku jiraan lacag bixinta si aad uga qaybqaadato ama bakhshiis sharci daro ah.
- Khayaano - ha ahaato been-abuur ah, wax ka tagis ah, ama si kale.

Musuqmaasuqa Lacagta

Waa inaad taqaanaa isticmaalka uu macaamiilka sheegay iyo isticmaalka macaamiilka ee alaabtayada iyo adeegyadeena. Marna ha furin koonto macaamiil cusub adigoon helin dukumeentiyada loo baahan yahay.

Si degdeg ah ugu sheeg kormeerahaaga wixii ah hawl aan caadi ahayn ama shaki ku jiro ee koonto ka socdo. Tani waxaa ka mid ah codsiyada ama dhaqdhaqaaqa macaamiilka oo aan caadi ahayn, macaamiil ganacsi oo aan caadi ahayn ama shaki laga gabo, ama caddayn kale oo suurtogal ah ee ku saabsan khayaano, musuqmaasuqa lacagta, ama falal kale oo sharci darro ah.

Laaluushka, Musuqmaasuqa, Hadiyadaha, iyo Madadaalada

Shirkadda waxay mamnuucdaa dhamaan noocyada laaluushka iyo musuq-maasuqa, oo ay ku jiraan fududeynta lacag bixinta, bixinta lacagta ka qaybqaadashada, ku-xadgudubka maamulka, ama si xun u isticmaalida hantida Shirkada.

Marnaba ha bixin ama qaadan wax qiimo leh oo loo tixgelin karo laaluush ahaan ama abaalgud ama taasoo si khalad ah ula xiriirto natiijo gaar ah ama faa’iido gaar ah. Waa inaadan waligaa ballanqaadin, bixin, siinin, codsan, ama aad helin wax qiimo leh adigoo ku bedelanaayo faa’iido taas oo aan cadaalad ahayn, ku abaalmarinta ama reebitaanka shaqada, ama ujeedo aan habooneyn. Tani waxaa ku jira lacag yar oo la siiyo shaqaalaha hoose ee dadweynaha si ay u gutaan waajibaad caadi ah. Sidoo kale ma amri kartid ama oggolaan kartid qof kale inuu kuu sameeyo waxyaalahaan adigoo ogg.

Go’aannada la sameeyo iyadoo la matalaya shirkadda waa inay ku saleysnaadaan dhaqdhaqaaqa ganacsiga ee la ogol yahay iyo arrimaha sida tayada, qiimaha, iyo adeega. Siinta cuntada, cabitaannada, iyo madadaalooyinka ee la socda wada-hadalka ganacsiga waa dhaqan ganacsi oo caadi ahaan la aqbalo. Laakiin, habdhaqanka martigelinta, waa inuu ahaadaa wax macquul ah oo caadi ah si looga fogaado in wax loogeysto sharafnimada ama sumcadda dadka la soo dhaweynaayo ama Shirkadda. Adiga ama xubin ah qoyskaaga kuugu dhaw waa inaysan siinin macaamiisha

DHACDO

Waxaan la shaqeeyaa mas'uuliyiin badan oo dawladda iyo maamulka maxalliga ah qayb ahaan shaqadayda. Si aan u helo fursad aan kula hadlo, inta badan waa inaan qado u raacaa iyaga. Ma caadi baa shirkaddu inay u gado qado iyaga? Ka waran haddii aan ku bixiyo cuntada lacagteyda?

Guud ahaan, waa inaadan lacag ku bixin hadiyado ama cuntada loogu talagalay mas'uuliyiinta dawladda. Mas'uuliyiinta dawladda waxaa badanaa reeba sharciyo gaar ah oo la xiriira waxa laga yaabo inay aqbalaan ama aqbalin marka la eego hadiyadaha. Ku bixinta cuntada lacagtaadaada waxba kama beddeleyso xaaladda. Haddii aad u maleynaysid inaad gali karto xaalad sirgaxan, waa inaad la hadasho kormeerahaaga ama la xiriirto Waaxda Sharciga si aad u hesho hagitaan.

DHACDO

Whitney wuxuu ka shaqeeyaa goobta isu-geynta. Waxay timaadaa shan iyo toban daqiiqo kahor waqtigeeda maalin kasta waxayna isla markiiba diiwaangelisaa inay shaqada soo gashay. Markii ay diiwaangeliso inay shaqada soo gashay ka dib, Whitney waxay aadaa qolka nasashada waxayna eegtaa teleefoonkeeda waxayna sugtaa in xiligeeda shaqo bilowdo. Marka Whitney ay soo gudbiso xaashideeda waqtiga shaqada, waxay xaqiijisaa in saacadaha xaashida ay tuseyso inay shaqeeysay ay run yihiin oo ay sax yihiin. Miyay Whitney samaysay khiyaano?

Waxay u badan tahay in Whitney ay samaysay khiyaano. Whitney waxay keliya xaq u leedahay in la siiyo lacagta wakhtiga ay shaqayso ee maaha in lacag lagu siiyo wakhtiga ay ku bixiso arimaha qaaska ah ka hor intaysan bilaabin shaqadeeda. markay xaqiijiso in saacadaheedu run yihiin oo ay sax yihiin waxay bixineysaa isadaba-mar ku saabsan waqtigeeda.

hadda jiro ama macaamiisha suurtogalka ah ama alaab-qeybiyeyaasha, ama waa inaysan ka aqbalin ama ka codsan hadiyado qiimahooda ka badan yahay qiimaha caadiga ah. Waa inaadan aqbalin wax kasta oo saameyn ku yeelan kara ama u muuqda inuu saameyn ku yeelan kara go'aankaaga. Xaaladaha intooda badan aqbalaaddaada hadiyadaha, madadaalada, ama adeegyada waa inay dhacdo marka ay la xiriirto kulan shaqo ama marka macaamiilka/alaab-qeybiyaha uu siiyo dadka kale iyadoo qayb caadi ah ka ah shaqada. Waa inaadan marnaba aqbalin lacag lagu siiyey, amaah, mudnaan gaar ah, ama abaalmarin ka timid qof kale ee la xiriira ama loogu talagalay saamaynta ganacsiga Shirkadda, adigana waligaa ma siin kartid waxyaalahaan macaamiisha hada jiro ama kuwa suurtogalka ama alaab-qeybiyeyaasha Shirkadda. Marka lala macaamulaayo sharci-dajiyayaasha dawladda ama shaqaalaheeda ama saraakiisha kale ee dawladda waa inaad si gaar ah ugu fejignaataa sharciyada iyo xeerarka khuseeya ee xukuma hadiyadaha, deeqaha, madadaalada, iyo lacagaha kale ama eexashooyinka.

Khayaano

Shirkadayadu waxay si adag u mamnuucdaa dhammaan noocyada khayaanada. Khiyaanada waxaa lagu qeexaa fal kasta oo qasad ah ama ula kac ah oo lagu khiyaaneeyo qof iyadoo ujeedadu tahay in qofka laga xayuubiyo xuquuq, laga helo faa'iido ama lagu geysto dhaawac. Khiyaanada ayaa ku lug yeelan kartaa ku guuldareysiga bixinta macluumaadka la xiriira hawlaha ganacsiga. Intaa waxaa dheer, Shirkaddayadu waxay mamnuucdaa bixinta warbixin khaldan ee ku saleysan fejignaan la'aan ama taxadar la'aan.

Sheeg walaacyo kasta oo aad qabtid oo ku saabsan samaynta lacagta been abuurka ah, laaluushka, musuqmaasuqa, hadiyadaha iyo madadaalada, khayaanada, ama hawlaha kale ee aan habbooneyn. Waxaan leenahay siyaabooyin badan oo aad heli karto si aad u soo gudbisid walaacyada, oo ay ku jiraan maamulahaaga, waaxda shaqaalaha, Waaxda Sharciga, Khadka Caawinta ee Shirkadda Otter Tail, iyo habraacyada Ka Hadalka ee ku yaala hoos. Waxay masuuliyad kaa saaran tahay inaad soo sheegto dhacdooyinka aad la kulantid iyo sidoo kale kuwa aad marqaati ka tahay ama aad ogaatid.

XEERKA MUSUQMAASUQA SHISHEEYAHA ("FCPA")

Xeerka Musuqmaasuqa Dibadda (Foreign Corrupt Practices Act, "FCPA") ee Mareykanka wuxuu mamnuucayaa siinta wax qiimo leh, si toos ah ama toos aheyn, saraakiisha dawladdaha shisheeye ama musharrixiinta siyaasadeed ee shisheeye si loo helo ama loo xajisto ganacsiga. Waa inaadan cidna laaluushin sababtaadu tay dooniba ha noqotee, haddii aad la macaamiilayso dawladaha ama ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Waa inaadan lacago sharci-darro ah siinin mas'uuliyiinta dowladaha naftooda ama adigoo u maraaya dhinac saddexaad. Iyadoo loo eegayn goobta shaqsiyeed ama goobta ganacsi, waa inaad u hoggaansanaataa xeerka FCPA. Xeerka FCPA wuxuu ka dhigayaa laaluushida mas'uuliyiinta dawladda mid dembi ah waana la dabaqaa mar alla markii Shirkadda ay sameynayso ganacsi. Si loo raaco shuruucda ka dhanka ah laaluushka, waa inaadan marnaba u siin, si toos ah ama si aan toos aheyn, wax kasta oo qiimo leh, oo ay ka mid yihiin hadiyad ama madadaalo, mas'uul dawladeed kasta ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda si uu:

- u helo ama u xajisto ganacsi,
- saameyn ugu yeesho go'aanada ganacsiga, ama
- u xaqiijisto faa'iido ganacsi aan xaq aheyn.

Mamnuucyadani waxay quseysaan howlahayaga ganacsiga iyo qof kasta oo ina matalaya, oo ay ku jiraan wakiilada, la-taliyeyaasha, alaab-qeybiyeyaasha, iyo qandaraasleyaasha.

HANTIDA SHIRKADDA IYO ASTURNAANTA

Dhammaanteen waxaynu mas'uul ka nahay isticmaalka habboon ee hantida, goobabta, iyo qalabka Shirkadda. Haddii aadan haysan heshiis qandaraas qoran oo gaar ah, xuquuq sharciyeed, ama siyaasad Shirkadeed oo si kale sheegaysa, hantida Shirkadda (oo ay ku jiraan software-ka iyo nidaamyada keydinta xogta), goobaha, kaararka lacag gelinta, iyo alaabta la qeybiyay waa in loo isticmaalo kaliya ganacsiga Shirkadda. Markaad ka tagtid shaqada, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad soo celiso dhammaan hantida Shirkadda, oo ay ka mid yihiin dhammaan agabyada qoraalka ah ee sirta ganacsiga ah. Iimeelka, farriinta codka, waraaqaha, faylasha xogta, iyo macluumaadka kale ee la midka ah ee la dhigay ama lagu hayo teleefoonka Shirkadda gudihiisa, kombiyuutarka iyo nidaamyada kale ee macluumaadka looma aqoonsado mid asturan ama qarsoodi ah. Tani macnaheeda waa in macluumaadka noocaas ah ay dib u eegi karaan dadka kale ee Shirkadda.

XADGUDUBYADA IYO BAARITAANADA

Ka shakin walba ee ah ku xadgudubka Xeerka Anshaxa Ganacsiga waxaa si buuxda lagu baari doonaa heerka ku habboon. Haddii aad ku xadgudubto Xeerka Anshaxa Ganacsiga, waxaa laga yaabaa in lagugu qaado ficil edbin ah oo gaaraya illaa iyo in ay ku jirto shaqo ka joojin, iyadoo ay ku xiran tahay duruufaha xadgudubka. Sida sharcigu faraayo, ka dhaafida qodob kasta ee Xeerkan Anshaxa Ganacsiga agaasimaha ama madaxa fulinta ayaa laga yaabaa inay ansixiyaan kaliya Guddiga Hanti Dhowrka ee Guddiga Agaasimayaasha ee Otter Tail Corporation waana in si dhakhso ah loo shaaciyaa sida loogu baahan yahay.

SU'AAL IYO JAWAAB

Waa maxay aargoosashada?

Aargudashadu waxay dhacdaa marka qof ciqaabo ama waxyeelo xun u geysto qof kale maadaama uu qofka kale ku lug yeeshay howlo sharciyan ilaashan. Aargudashada waxaa ka mid noqon kara laakin kuma xididna ficil kasta oo xun, sida darajo ridid, edbin, shaqo ka eryid, dhimis mushahar, ama beddel shaqo ama gelin. Aargudashadu waxay noqon kartaa mid aad u kooban waxaana ku jira ficil kasta oo ka horjoogsan kara qof caqligal ah inuu ku lug yeesho howlaha la ilaaliyo, sida gudbinta cabasho ama gudbinta bayaan qayb ka ah baaritaanka.

AARGOOSASHADA

Shirkadu uma dulqaadan doonto in qaabkey ahaataba laga aargoosto iyadoo sababtu tahay macluumaad aad niyad wanaagsan ku bixinayso oo la xiriira Xeerkaan Anshaxa Ganacsiga.

KA HADALKA

Qof kasta oo inaga mid ah wuu dareensan yahay rabitaanka sheegida markuu wax u muuqan ama la aheyn sax ama qaldan yahay. Waxaa laga yaabaa inaan ka labalabaynay, taasna waa wax dabiici ah. Laakiin, gaar ahaan marka ay timaado anshaxa shirkadaha, ku guuldaraysiga inaad wax sheegto waa go'aan oo aan fiicneyn mar waliba.

DHACDO

Jason wuxuu dhawaan walaac badqab u soo sheegay maareeyaha warshadda maalin uu kormeerihiisa, Steve, uu xaadiray ballan dhakhtar. Steve wuu ka xanaaqay Jason sababtoo ah wuxuu u arkay in tani ay keentay in maareeyaha warshadda uu u arko in isaga yahay qof xun. Wixii markaas ka dambeeyay, Steve waxaa uu dhowr jeer hadallo deelqaaf ah ku yiri Jason, sida, "Ma u sheegtid maareeyaha warshadda." Intaa waxaa dheer, dib u eegista waxqabadka Jason aad ayuu uga hooseeyay dib u eegistii hore, Steve ayaana ka saaray kulamo badqab oo muhiim ah. Jason waxa uu aaminsan yahay in loo ciqaabayo warbixinta badqab ee uu u gudbiyay maareeyaha warshadda uuna wajahayo aargoosi. Jason wuxuu aad uga walwalsan yahay in haddii uu walaaciisa soo sheego ay xaaladda ka sii darto. Maxaa la gudboon inuu sameeyo?

Jason waa in uu waxa uu la kulmaayo uga soo warbixiyaa waaxda shaqaalaha, maareeyaha warshada ama uu ku soo sheegaa khadka caawinta ee Otter Tail Corporation. In kasta oo Shirkadu u baahan karto macluumaad dheeri ah si buuxda loogu fahmo xaaladda, waxaa muhiim ah in la soo sheego walaaca si loo xaqiijiyo in Steve uusan ka aargoosaneyn Jason.

Ka warbixinta arrin ama su'aal waydiinta oo dhakhso ah waxay ilaalinaysaa Shirkadda waxayna badanaa oggolaaneysa xallinta arinta oo dhakhso ah wax ku oolna ah. Waxay sidoo kale siinaysaa xirfadlayaashayaga sharciga, kuwa u hoggaansanaanta, iyo kuwa anshaxa fursad si ay si buuxda dib ugu eegaan su'aashaada, walaacaaga, ama warbixinta kuna go'aamiyaan ficilka, haddii uu jiro, mid ku haboon. Waxaa lagaa filayaa inaad soo sheegtid xadgudubyada aad ka shakisan tahay ama xadgudubyada suurtogalka ah ee kadhanka ah Xeerka Anshaxa Ganacsiga. Haddii aad aragto ama aad ogtahay xadgudub, waxaa lagaa doonayaa inaad soo sheegto. Xadgudubka suurtagalka ah ama laga shakisan yahay ayaa si buuxda loo baari doonaa, waxaana la qaadi doonaa tallaabo sixitaan, markii loo baahdo. **Ka gaabinta soo sheegida xadgudub la ogyahay isla iyada ayaa ah xadgudub.** Haddii aad ka warqabto xadgudub ka dhan ah Xeerka Anshaxa Ganacsiga oo laga shakisan yahay ama suurtogal ah, waxaan rajeyneynaa inaad marka hore u sheegto kormeerahaaga ama waaxdaada shirkadda ee shaqaalaha. Badanaa arinta waxaa lagu xallin karaa heerkaas.

Wixii ku saabsan is sheegida, waxaan dhammaanteen nahay bini'aadam, dhammaanteena waxaan sameyn karnaa qaladaad. Waxa muhiimka ah waa in aan mas'uuliyada ficilkeena dusha u ridano. Inkastoo ay run tahay in is-sheegidu aysan kaa ilaalinaynin ciqaab, waxay badanaa keentaa in ciqaab yar lagaa siiyo dhammaan xadgudubyada marka laga reebo xadgudubyada waaweyn. Taas bedelkeeda, haddii ay goor dambe soo baxdo in aad ogayd xad-gudub, laakiin aadan soo sheegin, waxay tani noqon kartaa mid sii adkaynaysa arinta marka la go'aaminaayo ciqaabta.

Khadka Caawinta ee
Otter Tail Corporation
Wac: (800) 461-9330
FARIIN GAABAN/Qoraal: (218) 394-7272
Bogga Mareegta: coc.ottertail.com

Xaaladaha qaar, waxaa laga yaabaa inaadan ku faraxsanayn weydiinta kormeeraha, ama sarkaalka su'aal ku saabsan anshaxa ama u sheegida qof ku xadgudbka laga shakisanyahay ee Xeerkan Anshaxa Ganacsiga. Haddii ay xaaladdani soo baxdo, waxaad isticmaali kartaa Khadka Caawinta Shirkadda Otter Tail Corporation. Adeeggan bilaashka ah ayaa la heli karaa 24 saacadood, 7 maalmood asbuucii, si looga hadlo walaacyada anshaxa ama soo tebinta macluumaad ku saabsan xadgudubka kadhanka ah Xeerkan Anshaxa oo suurtagal ah. Khabiir tabobaran oo u shaqeeya urur kale, Convercent, ayaa ka jawaaba Khadka Caawinta.

Warbixinada qarsoodiga ah waxaa lagu soo gudbin karaa taleefoon, qoraal ama bogga interneetka. Si bogga mareegta loogu isticmaalo si qarsoodi ah, warbixiyaha waxaa uu haysataa labo ikhtiyaar:

1. Si qarsoon oo ku wajahan shirkadda - tani waxay qofka bixinaya warbixinta u oggolaanaysaa inuu aqoonsigiisa u sheego iibiyaheena khadka caawinta, Convercent, balse uusan usheegin Otter Tail Corporation. Convercent ayaa laga yaabaa in ay si qarsoodi ah ula xiriiraan qofka warbixinta dhiibaayo si ay uga helaan macluumaad dheeraad ah oo muhiim ah.; iyo
2. In qofku gabi ahaanba ahaado qarsoodi - cidda warbixinta dhiibeyso siin mayso aqoonsigooda Otter Tail Corporation ama Convercent.

Kahor inta aan warbixinta la soo gudbin, cidda warbixinta soo gudbineyso ayaa dib u eegi doonta waxaana la siin doonaa fursad ay ku sameystaan baswoodh/baaq sir ah. Cidda warbixinta soo gudbineyso waa in ay mar walba geliyaan baaqa sirta ah oo ay ku kaydiyaan meel ammaan ah. Baaqa sirta ah waxaa uu u oggolaanayaa cidda warbixinta soo gudbineyso in ay eegaan heerka warbixintooda wuxuuna u oggolaanayaa in ay si qarsoodi ah ula xiriiraan baaraha. Cidda warbixinta soo gudbineyso waa inay tafaasiisha ugu badan ka bixiyaan dhacdada la soo sheegay. Warbixinta lagu soo gudbiyo Khadka Caawinta – haddii ay tahay taleefoon ahaan, qoraal, ama gelinta websaydka – ayaa si buuxda loo baarayaa waxaana tallaabo saxitaan ah loo qaadayaa sida lagama maarmaanka ah.

Guddiga Hanti Dhowrka ee Guddiga Agaasimayaasha ee Otter Tail Corporation ayaa kormeeraya barnaamijkaan waxaana si joogto ah loola socodsiiyaa warbixinada iyo baaritaannada.

GUUD AHAAN

Xeerkan Anshaxa Ganacsiga wuxuu badalayaa dhammaan siyaasadahii hore ee la midka ahaa ee ay sameysay Otter Tail Corporation ee ku saabsan mawduucyada lagu sharraxay kor. Waxaa loogu talagalay inay kabto oo aysan bedelin siyaasadaha kale ee gaarka ah, tilmaamaha, iyo hababka xukuma xiriirka aad la leedahay Shirkadda ee laga yaabo in mudo marka laga soo wareegaba ay Shirkadda hergaliso. Looguma talagelin inay abuurto qandaraas shaqo lagu heshiiyay ama maldahan. Shaqada Shirkadda waa shaqo ula jeedo ah haddii aysan shaqadaada lagu qeexin heshiiska shaqada oo qoran gaarna ah.

KHADKA CAAWINTA EE OTTER TAIL CORPORATION
Telefoonka: (800) 461-9330
FARIIN GAABAN/Qoraal: (218) 394-7272
Bogga Mareegta: coc.ottertail.com
Waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood usbuucii (adeeg bilaash ah)

05/2023